

Xeerarka guriga ee xerada qaxootiga

Qofka ku jira xerada qaxootigu waa in uu u hoggaansamaa xeerarka guriga. Xeerarka waxaa loo sameeyay si ay bey'adda degaanku u ahaato mid wacan oo ammaan ah.

1 Xasillooni, degganaan iyo ammaan

- Waxaa loo baahan yahay inay xeradu xasilloon tahay laga billaabo saacadda 23.00 ilaa 06.00.
- Ma loo baahna inaad qashqashaaddo ama u dhaqanto hab dhibaya dadka kale. Gacanqaad, wax jejebin ama wixii kale ee denbi ah UDI ayaa lagu wargelinayaa, booliskana dacwo ayaa loo gudbinayaa.
- Aagga dadka ka dhixceeyaa khamri ha ku cabbin.
- Aagga dadka ka dhixceeyaa iyo qolkaaga midna ha ku cabbin sigaar, shiishad ama sigaar-korontada.
- Lama oggola in xerada lagu haysto xayawaan rabbaayadaysan.
- Waa inaad barataa waxaad samayn lahayd haddii uu dhib dhaco ama uu xerada dab ka kaco.

2 Isticmaalka guriga iyo qalabka

- Hagaaji qolalka dadka ka dhixceeyaa iyo aagga dibedda ah ba. Baaskiillada, baabuurta carruurta lagu riixo iyo qalabka kale midna yaysan awdin marinnada lagu baxsado.
- Nadiifi oo hagaaji qolkaaka.
- Qashinkaaga kala sooc oo ku rid tanagyada qashinka.
- Joogto u dhaqa qolalka dadka ka dhixceeyaa. Waxaa la sameeyay liis ku tusaya tookada aad dhaqidda leedahay. Waa inaad tookadaada dhaqdaa.
- Makiinadda dhardhaqidda, qalabka kushiinka iyo qalabka dhaqmada u isticmaal sida ay dhigayaan tilmaamaha isticmaalkoodu.

3 Cawabariga

- Had iyo jeer waa inaad xerada weydiisataa in cawabari laguugu imaan karo.
- Xerada qaxootigu way kuu diidi kartaa in lagula cawabaryo.
- Qof kasta oo kula cawabaryaya waa inuu ahaadaa qof Norway deggan, oo uu shaqaalaha xerada tusaa aqoonsi shaqaynaya ama aqoonsiga magangelyadoonta
- Markuu ku soo booqdo qof kula cawabaryaya, waa inaad hubisaa inaad tixgelisaan dadka kale ee xerada deggan.
- Adiga ayaa mas'uul ka ah cuntada iyo jiifka martidaada.
- Dadka waaweyn carruurtooda, saaxiibbadood iyo xubnaha qoyskooda ee deggan xeryaha qaxootiga ee kale waa la cawabaryi karaan.
- Carruurta ka yar 18 sano waxaa la cawabaryi kara waalidkood, walaalahood iyo saaxiibbada ay isku da'da yihiin.